



Waxyeelada Galmada

Australiya gudaheeda, sharciga ayey ka soo horjeedaa inaad galmo ahaan qof waxyeelayso.

Qofka sameeya waxyeelo galmo wuxuu geli karaa xabsi, kii uu yahayba nin ama naag.

Haddii adiga ama qof aad taqaano uu khatar ku jiro ka wac boliiska **000**.

Booliiska Australia waa ammaan waana lagu kalsoonaan karaa.

Wixii ah macluumaad iyo tallo bixin qarsoon oo bilaasha wac **1800RESPECT 1800 737 732**.

Haddii aad u baahan tahay turjumaan bilaash ah wac **131 450**.

Dawlada Australiya (Australian Government) uma dulqaadato waxyeelada galmada xaalad walba ha ahaatee

Waxyeelada galmada waxay ku wajahan tahay qof kale oo aan raali ka ahayn.

Waxyeelada galmada waxaa ka mid noqon kara:

- ku khasbida qof in loo galmoodo ama uu sameeyo ficil galmo;
- ku khasbida qof inuu daawado sawirada jinsiga galmada; ama
- u galmoonshaha ama fal galmo ku sameynta ilmo.

Dumarku waxay leeyihiin xuquuq la mid ah ragga.

Shuruucda Australiya gudaheeda waxay ula dhaqmaan dumarka iyo ragga si siman.

Qof kastaa wuxuu xaq u leeyahay arko wanaag iyo xiriirada ammaan ee qoysaskooda, saaxiibadood iyo kuway jecel yihiin. Qalalaasuhu weligii sax ma aha. Ciddina inay aqbasho ma aha in si xun loola dhaqmo ama loo waxyeeleeyo.

Waxaa jira adeegyo dhaqan ahaan xasaasi ah Australiya gudaheeda oo ku caawin kara.

1800RESPECT waa adeega qaranka ee kala talinta xadgudubyada galmada, qalalaasha qoyska iyo guriga (Australia's national sexual assault, family and domestic violence counselling service). Waxay bixisaa macluumaad iyo talin online ka ah iyo taleefanka ah oo qarsoon bilaashna ah. La-taliyayaashu way ku dhageysan doonaan, kana jawaabi doonaan su'aalaha, waxayna kuu gudbin karaan adeegyada taageero ee kale kuna yaal xaafadaada.

Ka wac **1800 737 732** ama kagal website ka **1800RESPECT** ah www.1800RESPECT.org.au.

Ma u baahan tahay turjumaan?

Ka wac **Translating and Interpreting Service (TIS) 131 450**. Turjumaan ka socda TIS ayaa kaa caawin kara inaad la hadashid adeegyada kale, si kastaba ha ahaatee TIS ma bixiso la talin. Dhammaan wecitaanadu waa bilaash qarsoon oo gaar ah.